



SU'AALAH INTA BADAN LA ISKA WEYDIIYO Barnaamijka Tayada Biyaha ee Tijaabada ah

Waa maxay Barnaamijka Tayada Biyaha ee Tijaabada ah?

Qorshuhu waa in la rakibo 32 ah Goobaha Biyaha Laga caboo si gaar ah loo habeeyay isla markaana loo farsameeyay (DWS) oo ku yaala lix dugsi inta lagu jiro xagaaga iyada oo hadafku yahay in la yareeyo heerarka kiimikada lead oo laga dhigo 1 qaybood halkii bilyanba (ppb). Goobahan biyaha laga caboo ka soo baxaan “drinking fixtures” oo ay ku jiraan waxyaabo biyaha sifeeyaa ‘filters’ oo casri oo si weyn hoos ugu dhigi kara waxyaabaha kiimikada lead ka kooban ee biyaha la caboo. Wuxaan tijaabo biyaha ka qaadi doonaa toddobaad kasta si loo xaqiijiyo in DWS ay si sax ah u shaqeynayaan. Haddii barnaamijku muujiyo in uu yahay mid guuleysanaya, waxaan ku ballarin doonaa dugsiya badan. Wuxaan aaminsanahay in tani noo oggolaan doonto in la yareeyo heerarka kiimikada lead iyada oo hoos loo dhigayo kharashyada PPS.

Sidee baa loo doortay dugsiyada tijaabada ah?

Qorshayaasha degmada waxaa ka mid ah hal dugsi oo sare, laba dugsi oo dhexe iyo saddex dugsi oo hoose oo ku jira daraasadda tijaabada ah. Dugsiyada waxaa lagu doortay iyada oo lagu saleysanayo lahaanshaha ay leeyihiin ugu yaraan 15 oo ah goobaha biyaha laga caboo ka soo baxaan “drinking fixtures” oo tijaabadii laga qaaday lagu ogaaday in ay weli ka sareeyaan heerka 15 ppb ee loogu talagalay kiimikada lead ka dib marka halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures” la beddelay. Dugsiyadaasi waxay kala yihiin Arleta, Duniway, Jefferson, Llewellyn, Rigler iyo Robert Gray.

Waa maxay sababta loogu baahan yahay barnaamijka tijaabada ahi? Miyaynaan hagaajin goobaha biyaha laga caboo ka soo baxaan “drinking fixtures”?

Habka caadi ahaan loo wajaho yareynta heerarka kiimikada lead ee biyaha ku jira waa in la beddelo halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures” taasi oo ay soo raacdo beddelaada tuubooyinka biyaha ‘plumbing’ ee derbiga ka dambeeyaa haddii loo baahdo. Wuxaan taasi ku sameynay 2,600 oo ah halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures”. Si kastaba ha ahaaree, in ka badan 500 oo ah halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures” ayaa sii wada in tijaabadii laga qaaday ay muujinayso in ay ka sareeyaan heerka tallaabo qaadista ee gobolka ee 15 ppb. Wuxaan aaminsanahay in uu noqon karo hab kharashkiisu yar yahay isla markaana waxtar badan leh oo hoos loogu dhigo heerarka kiimikada, lagu yareeyo kharashyada iyo suurtgalnimada in la kordhiyo natiijooyinka ka soo baxa. Barnaamijkan tijaabada ahi wuxuu noo oggolaan doonaa in aan go’aan ka gaarno kharashyada dhanka rakibaada iyo dayactirka iyada oo sidoo kale la xaqiijinayo waxtarka uu leeyahay si loo yareeyo heerarka kiimikada lead.

Sidee buu barnaamijka tijaabada ahi u yareyn doonaa heerarka kiimikada ee lead si looga dhigo 1 ppb?

Wuxaan tiro kooban oo ah goobaha biyaha laga caboo (DWS) oo meelo gaar ah ku yaala si gaar ahna loo farsameeyay ku rakibeynaa dugsi kasta oo tijaabo ah. DWS kastaa wuuu yeelan doonaa laba ah tuubooyinka biyaha laga caboo ‘bubblers’ iyo qalab dhalooyinka/caagadaha biyaha buuxiya si ay u bixiyaan biyo sifeysan oo gaarsiisan ama ka hooseeya heerka 1 ppb ee loogu talagalay kiimikada lead. Si loo gaaro tani, wuxaan cilmi-baarlis ku sameynay nidaamka wax sifeeyaa ee ay aqoonsan tahay Hay’ada Nadaafada Qaranka (NSF) ee loogu talagalay yareynta qiyaasta heerarka kiimikada lead si looga dhigo 1 ppb inta loogu talagalay ay cimri ahaan shaqeyso oo awoodeedu tahay ugu yaraan 6,000 gallons.

Sidee baanu u aamini karnaa PPS in ay noqon doonto mid badbaado leh?

Inta lagu jiro xagaaga waxaanu rakibi doonaa DSW si gaar ah loo farsameeyay oo uu soo raaco tijaabo ballaaran oo laga qaadayo toddobaad kasta isla markaana lala soconayo si loo xaqijiyo in qalabkani uu u shaqeynayo sidii loogu talagalay. Waanu sii wadi doonaa la socodka toddobaadlaha ah, iyada lala soconayo heerarka kiimikada lead ee bisha u horreysa dugsiga xilliga dayrta ah. La socodka marka waqtii la joogaba ayaa sii socon doona ilaa laga gaarayo dhammaadka sanad dugsiyeedka 2019. Natijjooyinka tijaabada la sameeyo waxaa laga dhigi doonaa mid laga heli karo internet-ka oo qof kastaa arki karo.

Waa maxay heerarka kiimikada ee dugsigayga(dugsiyadayada)?

Heerarka kiimikada lead ee halka qasabadaha biyuhu ka soo baxaan “faucets” way kala duwan yahay dugsi kasta laakiin kuwa leh calaamadaha cagaaran way ka hooseeyaan heerka tallaabo qaadista ee 15 ppb ee PPS iyo Maamulka Caafimaadka Oregon. Kani waa heer la mid ah ka Hay’adda Illaalinta Deegaanka uga baahan tahay guryaha. Wuxaad booqan kartaa internet-ka pps.net/Page/5378 si aad u aragto heerarka loogu talagalay halka qasabadaha biyuhu ka soo baxaan “faucet” oo kasta oo ku taala dugsiga. Hoos u raac & riix natijjooyinka 2017-2018.

Waa maxay sababta aynaan hore ugu isticmaalin waxyaabo biyaha sifeeyaa ‘filters’?

PPS way soo isticmaashay waxyaabo biyaha sifeeyaa ‘filters’. Si kastaba ha ahaatee, waxyaabaha biyaha sifeeyaa ‘filters’ si ku haboon looma dooran isla markaana looma ilaalil. Intii lagu jiray baaritaanka qasabadaha biyuhu ka soo baxaan ‘water fixtures’ ee 2016, isugeyn dhan 920 oo ah waxyaabaha biyaha sifeeyaa ‘filters’ ayaa la ogaaday in ay jiraan, welina ma uusan jirin barnaamijka dayactirka oo la hirgeliyay, iyada oo qaar badan oo ka mid ah waxyaabaha biyaha sifeeyaa ‘filters’ aysan waxtar u lahayn in ay yareeyaan kiimika lead.

Daraasadda tijaabada ahi lacaga ma u badbaadinaysaa degmada?

Haddii daraasadda tijaabada ah lagu guuleysto, degmadu waxaa suurtagal ah in ay badbaadiso malaayiin doolar oo lagama maarmaan u ah in lagu beddelo tuubooyinka biyaha ‘plumbing’. Isla mar ahaantaana, heerarka kiimikada lead waxay noqon karaan kuwo aad u hooseeya.

Sidee bee inta badan waxyaabaha biyaha sifeeyaa ‘filters’ loo beddeli doonaa?

Tani waa mid ka mid ah waxyaabaha u muhiimsan xogta ee la go’ aamin doono inta lagu jiro tijaabada. Waqtigan la joogo waxaanu aaminsanahay in waxyaabahan biyaha sifeeyaa ‘filters’ ay jiri doonaan inta u dhaxaysa lix bilood iyo gal sano.

Sidee baa PPS ay u damaanad qaadi doontaa in waxyaabaha biyaha sifeeyaa ‘filters’ lagu beddeli doono waqtigii loogu talagalay?

Waanu kormeeri doonaa DWS oo kasta si aanu ula socono heerarka kiimikada lead ilaa iyo in waxyaabaha biyaha sifeeyaa ‘filters’ loo baahdo in la beddelo. Tani waxay bixin doontaa qiyaasta saxda ah ee kharashyada dayactirka ee sanadlaha ah.

Muddo intee le’eg ayuu barnaamijka tijaabada ahi socon doonaa?

Waqtigan lagu jiro barnaamijka waxaa la qorsheeyay in uu dhaqangelo la soo bilaabo xagaaga 2019 ilaa laga gaarayo Janaayo 2020. Tani waxay noo oggolaan doonaa in aanu xisaabinayo kharashyada dayactirka ee sanadlaha ah. Haddii waxqabadka Goobta Biyaha Laga cabu uu weli yahay mid la aqbali karo dhammaadka waqtigan, waxay u badan tahay in aanu barnaamijka ka sii wadno lixda dugsi. Haddii barnaamiju muujiyo in uu yahay mid guuleysanaya, waxaanu fiirin doonaa in aanu ku ballaarino dugsiyada PPS oo dhan.

Goorma ayaad ogaan doontaan in tani tahay mid guuleysanaysa?

Waxaanu natiijooyinka qiimeynta ku sameyn doonaa Janaayo 2020 iyada oo halkaasi la go'aamin doono tallaabooyinka xiga.

Waa immisa lacagta uu barnaamijka tijaabada ahi ku kici doono?

Barnaamijka tijaabada waxaa la saadaaliyay in uu ku kaco \$220,000. Tani waa marka la barbardhigo \$1.2 malyuun ee ku baxaya si qayb ahaan loo beddolo tuubooyinka biyaha ‘plumbing’ lixda dugsi. Waxaanu qiyaastnay in uu ku kaco wax in yar ka badan \$3 malyuun si DWS loogu rakibo dhammaan degmada.

Maxaa dhacaya haddii aanan rabin in ilmahaygu ka qayb qaato barnaamijkani tijaabada ah?

PPS waxay sameyn doontaa tiro kooban oo ah goobaha biyaha dhalooyinka/caagadaha laga caboo ee la heli karo. Si kasta ha ahaatee, maskaxda ku hay in DWS kastaa oo ka tirsan barnaamijka uu shaqadiisa u qaban doono sidii loogu talagalay haddii uu mashruuca tijaabada ahi yahay mid socda.

Maxaa ku dhacaya goobaha caadiga ee biyaha laga caboo ka soo baxaan “drinking fixtures” ee ku yaala dugsiga?

Goobaha biyaha laga caboo ka soo baxaan “drinking fixtures” ee hadda jira kuwo hawlgab ah ayaa laga dhigi doonaa inta lagu jiro barnaamijka tijaabada ah.

Miyay ardayda iyo shaqaaluhu u baahan yihin in ay sameeyaan wax ka duwan isticmaalka goobaha biyaha laga caboo ee sida gaar ahna loo farsameeyay?

Waxaanu kula talinaynaa ardayda iyo shaqaalaha in ay soo qaataan dhalo biyo ah. Waxaa sidoo kale jiri doona tuubooyinka biyaha laga caboo ‘bubblers’ si looga caboo saldhigiyada biyaha. Kala duwanaanshaha weyn ee jiraa waa in ay jiri doonaan meelo yar oo biyaha la helayo dugsiga dhexdiisa sidaa darteed haysashada dhal/caagad dib loo buuxiyo ayaa si fiican u shaqayn doonta.

Waa maxay heerka badbaadada leh ee kiimikada lead ee ku jira biyaha la caboo?

Tani waa su'aal loogu talagalay maamulayaasha caafimaadka ee gobolkeeda iyo dowlaadeena. Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa dhawaan soo saaray xeerar tilmaamaya in biyaha la caboo ee dugsiyada ay tahay in ay ka hooseeyaan heerka 15 ppb. PPS waxay u hoggaansan tahay heerarkan la raacyo laakiin inta lagu jiro barnaamijkan tijaabada ah waxaanu aaminsanahay in ay farsamo ahaan iyo dhaqaale ahaanba ay suurtagal tahay in la yareeyo heerarka kiimikada lead oo laga dhigo 1 qaybood halkii bilyanba (ppb) ee dugsiyada ku yaala guud ahaan degmada.